Waa Maxay adeegyada Hadolka iyo Luuqadaha ee Toronto ee Ilmaha aan Da'da Iskuulka Gaarin?

Adeegyada Hadalka iyo Luuqadaha ee Toronto ee Ilmaha aan Da'da Iskuulka Gaarin waa isbahaysi beesha oo loogu talagalay inay u fidiyaan adeegyo ilmaha aan da'da iskuulka gaarin marka ay dhashaan ilaa ay ka gaaraan shan sano.

Barnaamijkan ku salaysan beesha wu-xuu fidiyaa ilmaha iyo waaliddiintooda adeegyada ah daryeelka caruurta, barnaamijyada baahida qoyska, maalin joogga, barnaamijyada iskuullada ilmo haynta, isbitaalada deegankooda iyo xarumaha kale ee u dhow beesha ay ilmuhu deggan yihiin.

Maqaalkani wuxu kuu sheegayaa sida ay ilmuhu u bartaan dad la xiriirka iyo wax ka jawaabidda waqtiyada kala duwan ee koritaankooda. Haddii ay kuugu muuqato in ilmahaagu sidii aad rabi lahayd aynan wax ugu baran la xirrirka dadka, fadlan wac Adeegyada Hadalka iyo Luuqada ee Toronto ee Ilmaha aan Da'ada iskuulka Gaarin Tel. (416) 395-0411.

Sida ilmaha (2-5 sano) hadalkooda iyo luuquaddoodu u koro

Da'da u dhexeysa 2 ilaa 5 sano, ilmuhu wax badan ayey bartaan. Ereyada ay ku dhawaaqi karaan si dhaqsi ah ayey u kordhaan. Isticmaalkooda hadalku aad ayuu u kordhaa marka ay su'aalo badan weydiin bilaabaan ee la xiriira noolal maalmeedka. Waxay jecel yihiin sheekooyin iyo heeso dhegeysiga. Marar badan waxay ku weydiistaan inaad ugu soo celcelisid hal sheeko. Mararka qaarkood waxay si wanaagsan u xusuustaan ereyo sheekooyinkaas ka mid ahaa iyada oo la malaynayo inayba wax akhrinayaan. Marka la gaaro in ilmahaagu ay iskuulka caadiga ah aadaan waa in dad la xirrirkooda iyo wax maqalkoodu wanaagsan yahay.

Caruurta aad u yar yar (ilaa Saddex bilood jir) waxay samayn karaan:

- Cod bay sameeyaan (sida buus, ama qosol)
- Waxay u jeestaan meesha looga yeedho
- Way boodaan haddii ay maqlaan cod dheer.
- Way amusaan haddii aad cod qabow kula hadashid
- Way kuu dhoola cadeeyaan

Marka ay lix bilood jiraan:

- Wejigaaga ayey eegaan markaad hadashid
- Si kala jaad ah ayey u ooyaan markay gaajoodaan
- Cod ayey ka daba yidhaahdaan marka aad lahadasho
- Codad ayey sameeyaan si ay kuu soo jeediyaan
- Way kuu qoslaan adiga iyo inta reerka ah ee ay yaqaaniin

Goorma ayaad caawimo u yeedhan kartaa

- *Marka ilmahaagu aanu u hanqal taagin ama maqal codkaaga ama sanqadhaha kale.*
- *Marka ilmahaagu aanu qoslin ama cod kale samayn marka uu soo jeedo.*

Maxaad samayn kartaa si aad ilmahaaga hadalka u bartid

- La hadal ilmahaaga markasta oo ad u qubaynayso ama u bedelayso, ama aad wax siinayso
- U hees ama sheeko caruureed uga sheekee
- La ciyaar, ciyaaro fudfudud sida dhumaalaysi
- Tus ilmahaaga sawirada buugaga kana hadal waxa aad tusaysid.

Markaa ay laba iyo toban bilood jiraan:

- Magacooda ayey fahmaan
- Waxay fahmaan kelmadaha sida " Nabadgelyo, istaag"
- Way qoslaan waxaanay isku dayaan inay codkaaga oo kale sameeyaan

Goorma ayaad caawimo u yeedhan kartaa

- *Marka ilmahaagu aanu gacanta kuu taagin marka aad ku tidhaahdo nabadgelyo*
- *Marka aanu kuu tilmaamin sheeyada isaga oo soo qabsanaya ama eegaya*

Marka ay shan iyo toban bilood jiran:

- Markiisa ayuu codka sameeya
- Laba ama saddex kelmadood ayuu sheega oo aan bayaan ahayn
- Wuxuu fahmaa maya waxaanu uu ruxaa madaxa
- Way tiigsadan shayga ay rabaan iyaga oo hadlaya
- Waxay fahmaan weedho yar yar sida, "mee sankaagii?", "kabahaagii I tus?"

Goorma ayaad gargaar u yeedhan kartaa

- *Ilmahu ma isku dayo in uu yiraahdo eray, ma sameeyo dhawaaq, farta ma fiiqo si uu u sheego waxa uu rabo.*

Marka ay Sideed iyo toban bilood jiraan:

- Waxay fahmi karaan magacyada qaybaha jidhkooda sida "Sanka, Dhegaha"
- Raadiyaan wixii la weydiiyo sida "soo qaado koofiyadaada"
- Waxay sameeyaan ku dayashooyin cusub ama hadalka aad tidhaahdid bay kaa daba yidhaahdaan.
- Waxay sameeyaan tilmaamo ama codsasho fara badan iyaga oo ku celcelinaya.

Goorma ayaad gargaar u yeedhan kartaa

- *Marka ilmahaagu aanu dayin dhaqdhaqaaqa aad samayso ama codkaagaba.*
- *Marka ilmahaagu bilaabo hadalo laakiin joojiyo.*

Marka ay labatan iyo kow bilood jiraan:

- Waxay tilmaamaan calaamadaha iyo sawirada ,sida "Mee McDonald"
- Waxay ku ciyaaran qalabka caruurtu ku cayaarto, waxayna iska dhigaan in ay carrusad wax siinayaan ama gaadhi raacayaan
- Waxay odhan karaan ilaa iyo 10 kelmadood
- Waxay qaatan amarka la siiyo sida "Fadhiiso ama Caanaha cab"

Goorma ayaad gargaar u yeedhan kartaa

- *Marka aad aragtid in ilmahaagu odhan karin ilaa 10 kelmadood ka yar*
- *Marka uu ilmahaagu khiyaali ahaan aanu ku ciyaarayn Alaabta ilmaha ku cayaaraan*

Marka ay labatan iyo afar bilood jiraan:

- Waa inay fahmaan in ka badan waxay odhan karan
- Waa inay isku dari karan laba kelmadood sida "Caano kale"
- Waa inay kala soo bixi karan shay keli alaabo badan sida "koob"

Goorma ayaad gargaar u yeedhan kartaa

- *Marka ay kugu adkaato inaad ilmahaaga fahanto waxa uu sheegayo*
- *Marka ilmahaagu kelmado yar odhan karo ama aanu isku dari karin*

Sidee ayaad ilmahaaga uga caawin kartaa barashada hadalka da'dan

- U la hadal ilmahaaga si fudud oo tartiiba ah oo faseex ah
- Eeg ilma marka uu kula hadlayo kuna amaan kartidiisa.
- U ciyaar ilma muusikada ugana sheekee sheekooyinka caruurta isla markaana
- Kala hadal meela cusub ama khibradaha inta aadan bixin ama marka aad la joogto iyo marka aad guriga timaadid
- Balaadhi waxa ilmuhu yidhaahdo sida haddii uu yidhaahdo "Ey" waxaad tidhaahdaa "Ey Weyn"

Sida caruurta hadalkooda iyo luqadoodu ay u koraan

Inta u dhexaysa da'da caruurta 2 sano ilaa iyo 5 sano aad ayey wax u bartaan. Tirada kelmadaha ay odhan karaana aad ayey u kordhaan. Hadalka way badiyaan, waxaanay ku weydiiyaan su'aalo fara badan. Waxay ka helaan in ay dhegeystaan sheekooyinka iyo miyuusiga. Mararka qarkood waxay ku weydiistaan in aad sheekooyinka ugu soo cel celisid dhawr jeer. Mararka qaarkoodna si fiican ay kelmada u xasuustan waxanay u ekaataa inay akhrin karaan sheekada. Marka uu gaadhu ilmuhuu xiligii Iskuulka wuxuu diyaar u yahay inuu si fiican u hadli karo ama u dhegeysan karo.

Marka ay laba sano ila saddex sano jiraan

- Waxay ku hadli karaan ereyo kob kooban, sida "Anigaa sameeyey", ama "Abbe gaadhiga tegayaa"
- Wuxuu qaadan kara tilmaamo fudfudud; sida "Dhig alaabtan sariirta kor keeda"
- Wuxuu dhigaa wixii aad u dhiibto meesha aad u tilmaanto ,sida "hoos, kor ama dhexda"
- Wuxuu la sheekaystaa dadka qoyska ka tirsan ama uu yaqaan.
- Wuu dhegeystaa sheekooyinka waana ka jawaabi kara su'aalaha fudfudud

Goorma ayaad caawimo u yeedhan kartaa

- *Marka ay ilmaha ku adkaato inuu hadlo*
- *Marka aad fahmi weydo waxa ilmuhu sheegayo*
- *Marka ilmuhu isku dari kari waayo laba kelmadood*
- *Marka ilmuhuu si fiican kuu dhegaysan waayo*

Marka ay saddex ilaa afar sano jiraan

- Caruurta inta badani marka ay da'dan jiraan waxay odhan karaan weedho
- Waxay kuu sheegan karaan waxay rabaan, sida "Waxan ii xidh"
- Waxay ku weydiiyaan su'aalo ,sidawaa maxay,waayo, halkee"
- Waxay kuu sheegaan waxay sameeyeen
- Waxay la hadlaan naftooda iyo waxa ay ku ciyaaraan
- Sheeko ayey sheegi karaan waanay heesi karaan
- Markay daalan yihiin ayey kuu sheegtaan

Goorma ayaad caawimo u yeedhan karta

- *Marka ilmuhu ku celceliyo hadalka laakiin aanu fahmayn*
- *Marka ilmuhu hadalka goo gooyo*
- *Marka dadka kele ay ku adkaato inay fahmaan waxa ilmahaagu sheegayo*
- *Marka ilmuhu isticmaalo kelmado aan caadi ahayn*

Sidaad uga caawin karta ilmahaaga dhibatooyinkaa da' dan

- Dhegayso marka ilmuhu kula hadlayo. Madaxa u rux una qosol si aad u tusto inaad fahamtay kana jawaab su'aalaha uu ku weydiiyo
- U ogolow inuu ilmahaagu la ciyaaro caruurta kale
- U sheeg sida ay waxyaaluhu u kala duwan yihiin isuguna eg yihiin
- Ka caawi ilmaha sidii uu u sheegi lahaa ra'yigiisa ama waxa uu dareemayo
- Isticmaal kelmado ama codad uu ilmuhu u arko inay ku adag yihiin. U ogolow inuu afkaaga eego marka aad odhanaysid kelmadahaas.
- U akhri ilmaha sheekooyin dhaadheer adiga oo isticmaalaya buugaaga ama sawiro
- Fidi waxa ilmuhu sheego. Haddii uu yidhaaho "ey" waxaad tidhaahdaa "ey weyn"
- Weydii su'aalo ku dhiiri gelinaya inuu hadlo

Marka ilmuhu jiro shan sano

- Caruurta inta badani, waxay u odhan karaan weedhaha ama hadalka sida dadka waaweyn
- Codadka intooda badan si saxa ayey u odhan karaan
- Kelmadaha intooda badan way macnayn karaan
- Hadalka isku xidhan ayey ku tilmaami karaan shay yada ama dhacdooyinka
- Waxay sharxi karaan siday u xaliyaan dhibaatooyinka yar yar
- Waxay qaadan karaan amarada, sida "soo qaado qalimaantaada" ama "sawir samee oo ku dheji talagada dusheeda

Goorma ayaad u yeedhan kartaa caawimo

- *Marka ilmuhuu aanu si fiican hadal dhan u odhan karin*
- *Marka ilmuhu aanu jeclayn inuu caruurta kele la hadlo*
- *Marka ay ilmaha dhib ku noqoto inuu sameeyo waxaad u sheegayso*



HADDI AAD MACAAWIMO U BAAHAN TAHAY WAX HA SUGIN!

Wac Adeegyada Hadalka iyo Luuqadaha ee Toronto ee Ilmaha Da'da Iskuulka aan Gaarin Tel. 395-0411.

- Haddii aad ka welwelsan tahay inaanu ilmahaagu si fiican u hadlaynin
- Haddii aad su'aal ka qabtid sida ilmahaagu uu u hadlayo
- Ama aad doonaysid sidii aad caawyimo ugu heli lahayd

Toronto Preschool Speech & Language Services

Waxaan si weyn ugu mahadcelinaynaa uruurka Hadalka iyo Luuqadaha ee Ilmaha Da'da Iskuulka aan Gaarin ee Ottawa-Carlton oggolaanshahooda inaan dib u daabac-no waxyaabaha maqaalkan aan ku qornay.

ADEEGYADA HADALKA IYO LUUQADAHA EE TORONTO EE ILMAHA AAN DA'DA ISKUULKA GAARIN.

- Tallaabo Ka Qaadid Marka Horeba
- Adeeg Helid Fududeysan
- Xog Ururin
- Tallaabo Qaadyo Kala Duwan
- Qorshaha Kala Guurka
- Taakuleynta Waaliidka
- Dareen Gelinta Bulshada

TORONTO Public Health • Ontario • Community Partners

Somali